# Su'aalo iyo Jawaabo
# Ku Saabsan Tallaalka COVID-19 ee Carruurta

**Maxay tahay sababta looga tallaalayo COVID-19 carruurta 6 bilood iyo ka weyn jira?**
Carruurta qaada COVID-19 aad bay u xanuunsan karaan iyo waxayna u baahan karaan in lagu daaweeyo isbitaalka. Tallaaladu waxay sii wadaan inay bixiyaan difaac adag ka soo horjeeda natiijooyinka ugu daran ee COVID-19. Tallaalka carruurta waxay sidoo kale siin karaan waalidiinta kalsooni weyn oo ku saabsan carruurtooda oo qayb ka ah daryeelka ilmaha, dugsiga, iyo hawlaha kale.

**Hal ama laba tallaal bay u baahan yihiin carruurta?**
Carruurta iyo dhallinyarada waxay u baahan yihiin laba tallaal. Carruurta da'dooda tahay 6 bilood iyo ka weyn waxay qaadanayan qiyaas ka yar kuwa dhalinyarada iyo dadka waaweyn.

**Maxay u qaataan carruuta qiyaas yar?**
Nidaamkooda difaaca way ka duwan yihiin kuwa dadka waaweyn. Qiyaasta hoose waxay bixisaa difaac aad u wanaagsan oo ka soo horjeeda COVID-19.

**Intee in le'eg ayaan sugi karnaa inta u dhaxaysa qiyaasta koowaad iyo mida labaad ee carruurta?**
Carruurta waa inay sugaan ugu yaraan siddeed toddobaad inta u dhaxaysa qiyaasta koowaad iyo mida labaad.

**Ma saameyn karaa tallaalka COVID-19 qaan-gaarnimada ama bacriminta carruurta?**
Maya. Ma jiro caddayn ama sabab cilmi ah loo aamino in tallaalka COVID-19 uu saameyn doono qaan-gaarnimada ama bacriminta.

**Ilmahaygu wuxuu qabay COVID-19. Ma heli karaa ilmuhu tallaalka COVID-19?**
Haa, ilmahaagu waxa uu qaadan karaa tallaalka siddeed toddobaad (2 bilood) ka dib marka uu qaaday COVID-19. Tallaalku wuxuu weli ka caawin doonaa inuu ka ilaaliyo cudurrada mustaqbalka.

**Intee in le'eg ayaan sugayna inta u dhaxaysa tallaalka COVID iyo tallaallada da’da dugsiga loo qorsgeeyay?**
Carruurta waxay u baahan doonaan laba qiyaasood oo tallaalka COVID ah ugu yaraan siddeed toddobaad ayaa loo kala dhexeeysiiya waxaana loo qiyaasi doonaa inay si buuxda ah u tallaaleen 14 maalmood ka dib markii ay qaataan mida labaad. Ilmuhu waa inuu sugo 14 maalmood kahor ama kadib tallaalka Covid-19 si uu u helo talaal joogta ah ilaa uu si kale oo ka duwan kula taliyo fidiyaha daryeelka caafimaadka.

**Aniga ama ilmahayga ma qaadi karnaa COVID-19 haddii aan hore u lahayn?**
Haa, adiga ama ilmahaaga waxaad qaadi kartaan COVID-19 haddii aad hore u lahaydeen, gaar ahaan Omicron. Tallaalka wuxuu ku siinayaa difaac dheeraad ah, xitaa haddii aad hore u lahayd COVID. Tallaalka wuxuu kaa caawin karaa ka hortagga cudur halis ah iyo dhimasho haddii aad mar kale qaaddo.

Immigrant Services
Association of Nova Scotia
isans

**Xayiraadaha badankood hadda waa la qaaday. Taasi miyay la macno tahay in COVID-19 aanu jirin, ama in uu khatar ahayn mar dambe?**
Maya, COVID-19 wali waa jiraa. Wali wuxu khatar u yahay dadka da'da ah iyo dadka qaba xaalado cudur dabadheeraad ah, gaar ahaan haddii aan la tallaalin. Waxa kale oo weli muhiim ah in la raaco tilmaamaha caafimaadka sida xirashada maaskaro meelaha gudaha/xiran ah, dhaqida gacmahaaga marar badan, daboolida afka markaad qufacayso, iyo in la qaato tallaalka.

**Caddaynta tallaalka looma baahna si looga qaybqaato dhacdooyinka aan muhiimka ahayn. Waa maxay sababta ay carruurtayda ama dadka waaweyni u qaadanayaan tallaalka?**
Tallaalka wuxuu kaa ilaalinayaa jirro halis ah iyo wuxuuna yareeyaa halista aad u gudbin karto dadka kale. Qaadashada tallaalka waxay kaa caawinaysaa ilaalinta carruurtaada, saaxiibbadaa, iyo bulshadaada. Hawlaha iyo shaqooyinka qaarkood waxay sii wadi doonaan inay u baahdaan caddaynta tallaalka (sida shaqaalaha daryeelka caafimaadka, macallimiinta, booqdayaasha isbitaalka, iyo wixii la mid ah.). Intaa waxaa dheer, haddii aad rabto inaad safarto, waa in si buuxda laguu tallaalaa si aad u tagto meelo badan oo Kanada iyo adduunka ah.

**Tallaalku ma galaa DNA-da jirka bini'aadamka? Waxaan maqlay sheekooyin badan oo talaalka faragelinayo beddelka hiddo-wadaha jirka bini'aadamka.**
Maya, tallaalka mRNA ma saameeyo DNA-gaaga. Xataa ma gasho xudunta unugyada.
Marka uu talaalka jirkaaga galo, waxa uu barayaa unugyada sida loo sameeyo borootiinka kicin doona jawaabta difaaca jirkaaga. Ma noqdo qayb ka mid ah unugyada ama kuma noola unugyadaada.

**Waa maxay sababta dadka qaarkiis ay u bogsadaan laakiin ay weli natiija baaritaanka tahay togan?**
Qofka qaba kiis la xaqiijiyay oo ah COVID-19 wuxuu muujin karaa natiijo togan baarista PCR-ka ilaa 90 maalmood ka dib marka uu cudurka qaado. Tani waxaa sabab u ah inuu baaritaanka PCR-ka ogaan karo qadar yar oo ah walxaha/maaddada fayraska. Tani micnaheeda ma’aha inaad weli faafinayso.

**Haddii ilmahayga difaaca jirka ka jirran yahay, miyay u qalmaan qiyaas dheeraad ah?**
Haa, carruurta da'doodu u dhaxayso 6 bilood ilaa 4 sano waxay heli karaan hal qiyaas oo dheeraad ah oo tallaalka Moderna COVID-19, 56 maalmood ka dib qiyaasta labaad. Dadka difaaca jirka ka jirran (5 sano ama ka weyn) waxay heli karaan hal qiyaas oo dheeraad ah oo tallaalka mRNA COVID-19, 56 maalmood kadib qiyaasta labaad.

**Xaggee carruurtayda ka heli karaan tallaalka COVID-19?**
Farmasiyaha, rugta tallaalka ee ballan la’aanta, ama isbitaalka IWK.

**Sidee ilmahayga u tallaali karaa?**
Intaadan bilaabin kahor:

- Waxaad u baahan tahay kaarka caafimaadka Nova Scotia oo ansax ah ee ilmahaaga si aad ballan uga qabsato onlayn.
- Waxaad u baahan tahay nambar telefoon haddii ay dhacdo in lagula soo xiriiro.
- Sii iimayl markaad ballan qabsanayso. Waxaad heli doontaa iimaylka xaqiijinta ee ballanta, iimaylka xusuusinta maalinta ka horreysa ballanta, iyo iimaylka ballanta ka dib oo wadata koobiga diiwaanka tallaalka ilmahaaga.

**Sida Ballanta Loo Qabto:**
Waxaad qabsan kartaa ballan tallaalka Covid-19:

- Onlayn rugta caafimaad: https://novascotia.flow.canimmunize.ca/en/9874123-19-7418965

Immigrant Services
Association of Nova Scotia
isans

- Taleefan adoo wacaya 1-833-797-7772 (Isniin ilaa Jimce, 7 subaxnimo ilaa 7 galabnimo, iyo Sabti ilaa Axad, 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo). Waxaad u baahan tahay inaad ka wacdo nambar taleefoon Canadian ah iyo aad joogtid Canada markaad soo wacdo. Haddii macmiilku u baahan yahay tarjumaad, tani waa habka ugu wanaagsan ee ballan lagu qabsan karo (eeg "Adeegyada Tarjumaanka la heli karo" ee hoose)

Macluumaad dheeraad ah, fiiri ISANS's Sida loo ballansado ballanta tallaalka – How to Book a Vaccine Appointment - Project Beacon website

Sida Loo Helo Rug Caafimaad Oo Ballan La'aan

Waxa kale oo tallaalada lagu bixiyaa rugaha caafimaad/kilinigyo kala duwan. Goobahan iyo waqtiyadani waxay is beddelaan toddobaad kasta. Waxaad ka heli kartaa liiska ugu casrisan ee rugaha caafimaadka beesha halkan:
**https://www.nshealth.ca/drop-in-vaccine-clinics**
Farmasiyaasha sidoo kale waxay fidiyaan rugga caafimaad ee ballan la'aan:
**https://pans.ns.ca/walk-covid-19-vaccine-clinics**

Adeegyada Turjumaanka ee la heli karo:

Haddii macmiilku u baahan yahay in loogu adeego luqad aan Ingiriisi ahayn, waxay waydiisan karaan turjumaan marka aad ballanta telefoonka ku qabsanayso wac 1-833-797-7772 (in ka badan 125 luqadood oo kala duwan ayaa diyaar ah). Khabiir takhasus leh ayaa dhammaan su'aalaha caafimaadka iyo baaritaanka macaamiisha iyo wuxuuna ka jawaabi doonaa wax kasta oo welwel iyo walaac ay macaamiisha ka qabaan tallaalka.
Farmasiyadu waxay kaloo bixiyaan buug-yar oo luqado kala duwan ku qoran ay macaamiisha akhrin karaan marka la tallaallo. Waxaa kaloo jiri kara goobta shaqaale turjumi kara.

**Coronavirus (COVID-19)**
**COVID-19 Vaccine**
**Vaccine safety and possible side effects**
**COVID-19 vaccine: Canadian Immunization Guide**
**COVID-19 vaccine for children and youth**
**Frequently Asked Questions about COVID-19 Vaccination | CDC**